

Xeerka Ka hortaga Sunta Alaabaha la isku Qurxiyo Su'aalaha iyo Jawaabaha Wacyi-gelinta iyo U Hogaansanaanta



Dhukumiintigan wuxuu soo koobayaa su'aalaha Wacyi-gelinta iyo jawaabaheena. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo la xariira Xeerka Kahortaga Sunta Alaabaha la isku Qurxiyo (Toxic-Free Cosmetics Act, TFCA) [Websaytka TFCA](https://ecology.wa.gov/tfca)¹ iyo [Boga saamileyda](https://www.ezview.wa.gov/site/alias__1962/38927/toxic_free_cosmetics.aspx).² Haddii aad qabto su'aalo, fadlan nagala soo xariir ToxicFreeCosmetics@ecy.wa.gov.

Qeexitaanka

Su'aasha 1: Sharciga Xeerka Kahortaga Sunta Alaabaha la isku Qurxiyo iyo sharciga xadida kiimikooyinka marka si kasta alaabaha loogu daro. Maxaa loo arkaa "in si ula kac ah loogu daray"?

Jawaab: Maadaama TFCA aysan qeixin erayga "in si ula kac ah loogu daray," waxaan doonaynaa inaan sharciga ku qeexno. Qeexitaankan qabyo qoraalka ah, anoo ku saleynayna [sharciga alaabaha sunta ah](https://ecology.wa.gov/tfca),³ ayaa lagu daray [sharciga qabyo qoraalka hore ee sunta alaabaha la isku qurxiyo](https://www.ezview.wa.gov/site/alias__1962/38927/toxic_free_cosmetics.aspx).⁴

"**Kiimikada sida kasta ah loogu daray**" ama "**waxyaabaha sida kasta ah loogu daray**" waxaa loola jeedaa kiimikada lagu daray alaabaha la gado ee la isticmaali karo, ama alaabaha soo saarka ama waxyaabaha lagu daro.

Haddii aad qaadano qeexitaankan sharciga ku jira, kiimikooyinka lagu daro baraafunada iyo alaabaha lagu ilaaliyo tayada alaabaha waxay la kulmi lahaayeen qeexitaanka "waxyaabaha sida kasta ah loogu daro" maadaama si kas ah loogu daray oo ay qayb ka yihiin waxyaabaha laga sameeyay. Arintan waxaa ka dhalan lahaa xadidaado.

Alaabaha sida kasta ah loogu daro waxaa kamid noqon kara waxyaabaha tayada lagu ilaaliyo ama maadooyinka lagu daro baraafunada. Waxyaabaha kamada ah ayaa lagu daray qeexitankaan "waxyaabaha sida kasta ah loogu daro."

1 <https://ecology.wa.gov/tfca>

2 https://www.ezview.wa.gov/site/alias__1962/38927/toxic_free_cosmetics.aspx

3 <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=173-337-025>

4 https://www.ezview.wa.gov/Portals/_1962/Documents/Cosmetics/TFCA_PrelimDraftRule_2024-07.pdf

TFCA kuma darto kiimikooyinka ku jira baakadaha alaabaha. Si aad u hesho macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan sunta kujirta baakadaha gobalka Washington, fadlan akhri xogta ku saabsan [baakadaha cuntada ee PFAS⁵](#) iyo [Farqada 70A.222 Xeerka Dib loo eegay ee Washington \(Revised Code of Washington, RCW\): Baakadaha leh Biraha iyo Kiimikooyinka Sunta ah.⁶](#)

U hogaansanaanta

Su'aasha 2: Waa maxay kiimikooyinka lagu xadiday Xeerka Sunta Alaabaha La isku Qurxiyo iyo Goortee la xadiday?

Jawaab: TFCA waxay xadiday shan kiimikooyin iyo afar nooc oo kiimiko marka si kas ah loogu daro alaabaha la isku qurxiyo. Shanta kiimiko waa:

- Formaldehyde
- Methylene glycol
- Triclosan
- meta-Phenylenediamine iyo cusbadeeda
- ortho-Phenylenediamine iyo cusbadeeda

Afarta nooc oo kiimiko waa:

- ortho-Phthalates
- Per iyo walxaha polyfluoroalkyl (Per and polyfluoroalkyl substances, PFAS)
- Mercury iyo waxyaabaha mercury ku jiro
- Sunta iyo waxyaabaha suntu ku jirto

TFCA waxay xadidaa sunta iyo alaabaha sunta leh marka ay jiraan ama ka badan yihin 1 qayb halkii milyan ee badeeco, haddii si ula kac ah loogu daray ama loogu darinba.

Xayiraadaha waxay dhaqan galayaan Janaayo 1, 2025. Alaabaha lasoo iibsaday si loo isticmaalo markay tahay ama kadib taariikhdaan waa inay u hogaansamaan [Xeerka Sunta alaabaha La isku Qurxiyo \(TFCA\)](#).⁷ Tafaariikhleyaasha Gobolka Washington waxay iibin karaan ama isticmaali karaan alaaboojin aan waafaqsanayn sharciga illaa Janaayo 1, 2026, haddii ay gacantooda ku jiraan kahor Janaayo 1, 2025.

Su'aasha 3: Yaa ka mas'uul ka ah hubinta in alaabtu u hogaansanto sharciga iyo in kale?

Jawaab: Haddii aad tahay qof wax soo saara alaaboo, si bareer ah wax u iibiya, u bixiya, qaybiya alaab si loo iibiyo, ama u qaybiya si loogu isticmaalo alaabta qurxinta Gobolka Washington, adiga ayaa masuul ka ah. Tan waxaa ka mid ah alaabada lagu iibiyo oonleenka iyo sidoo kale alaabta lagu iibiyo dukaamada alaabaha laga soo iibsado. Haddii aad tahay shirkad alaab soo saarta [RCW](#)

⁵ <https://ecology.wa.gov/PFAS-food-packaging>

⁶ <https://apps.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=70A.222>

⁷ <https://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=70A.560>

[70A.560.010](https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=70A.560.010)⁸ waxaad masuul ka tahay oggaanshaha waxyaabaha kujira alaabahaaga, haddii aad tahay shirkad alaab soo saarta ama haddii kaleba, hadaad alaabta qaybiso, ama gado.

Su'aasha 4: Waxaa maxay waxyabaha shirkadaha soo saara iyo qaybiyaashu inay sameeyaan si ay u hubiyaan inay u hogaaansameen sharciga cusub?

Jawaab: Wuxaan isticmaali kartaa mid ama in ka badan oo ka mid ah saddexda nidaam ee caadiga ah ee hoose si aad u go'aamiso haddii alaabtaadu ay kujirto mid ka mid ah kiimikooyinka sharcigu xaddiday.

- Ku samee dib u-eegis alaabta aan wali la sameyn ama tafatirka (shaacinta).
- Hel caddaynta u hoggaansanaanta sharciga ee shirkada alaabaha, sida Shahaadada Falanqaynta.
- Samee qiimeyn tijaabo ah.

Marka ay suurtagal tahay, waxaan kugula talinaynaa inaad la shaqeyso shirkadaha sahayda si aad u hesho macluumaadka aad u baahan tahay. Arintan waxaad ka heli doontaa macluumaadka ugu badan ee ku saabsan alaabaha aad haysato.

Si aad u hesho macluumaad hagid, fadlan akhri [Hagaheena Xeerka Sunta Alaabaha Is qurxinta](#)⁹ ama [iimayl noo soo dir](#)¹⁰ si aad u hesho caawimaad.

Su'aasha 5: Waxaa maxay waxyabaha looga baahan yahay tafaariikhleyda inat sameeyaan si ay u hubiyaan inay u hogaaansameen sharciga cusub?

Jawaab: Alaabaha aad **iibiso** ama **aad bixiso** si loo iibyo waxay u baahan yihin inay u hoggaansamaan TFCA.

- **Xusuusnow mudada iibka.** Tafaariikhleyda gobolka, badeecadaha aad gacanta ku haysaan laga bilaabo Janaayo 1, 2025, waxaa la iibin karraa ilaa dhammaadka 2025. Hantida kaydka ku jirta kadib Janaayo 1, 2025, waa inay u hoggaansamaan TFCA.
- **La xiriir soo saareyaasha** si aad u ogaato in badeecadaha aad iibsato ay u hoggaansamaan sharciga. Wuxaan kugula talinaynaa inaad arrintaan sameyso ka hor waqtiga kama dambaysta ah ee Janaayo 1, 2025, si aad u aqoonsato oo aad u iibiso ama aad meesha uga saarto waxyaabaha aan u hoggaansamin sharciga ee kujira qaanadaada.
- **Hubi liiska waxyaabaha badeecada lagu daray** si aad uga eegto kiimikooyinka xaddidan.

Si aad u hesho macluumaad hagid, fadlan akhri [Hagaheena Xeerka Sunta Alaabaha Is qurxinta](#) ama [iimayl noo soo dir](#) si aad u hesho caawimaad.

- Haddii alaab laga iibsaday dukaanka ama lagu iibyo khadka tooska ah la ogaado inaysan sharciga u hoggaansamin, waxaan la shaqeyn dooncaa tafaariikhleyda si aan uga saarno meesha badeecada aan u hoggaansamin sharciga ee taala dukaanka ama kaydka oonleenka.

⁸ <https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=70A.560.010>

⁹ <https://apps.ecology.wa.gov/publications/SummaryPages/2404019.html>

¹⁰ ToxicFreeCosmetics@ecy.wa.gov

- Waxaan la shaqeyn doonaa soo-saaraha, qaybiyaha, ama labadaba si aan u joojino qaybinta sheyga aan u hoggaansamin sharciga iibka ee Gobolka Washington.
- Waxaan bixinaa caawimaad farsamo si loo kor loogu qaado alaabta la aqoonsaday si loo waafajiyoo sharciga iibka ee gudaha Gobolka Washington.

Su'aasha 6: Waa maxay waxyabaha takhasuslayaasha alaabaha la isku qurxiyo ay hubin karaan si loogu hogaansamo sharciga cusub?

Jawaab: Alaabaha aad u isticmaasho si aad u bixiso adeeg ama uga iibiso macaamiisha macaamiishana waxay u baahan yihin inay u hogaansamaan TFCA.

- **Xusuusnow mudada iibka.** Badeecadaha aad gacanta ku haysaan laga bilaabo Janaayo 1, 2025, waxaa la iibin karaa ilaa dhammaadka 2025. Alaabada aad iibsato si aad u isticmaasho ama aad dib u iibiso ka dib Janaayo 1, 2025, waa inay u hoggaansamaan TFCA.
- **La xiriir qaybiyahaaga** si aad u ogaato in badeecadaha aad iibsato ay u hoggaansamaan TFCA. Wuxaan kugula talinaynaa inaad arrintaan sameyso ka hor Janaayo 1, 2025, ee ah waqtiga kama dambaysta ah, si alaab qaybiyaashu kuu siin karaan macluumaadka u hogaansanaanta. Haddii qaybihaagu uusan aqoon, waxaan la shaqeyn karnaa iyaga si aan uga caawino inay fahmaan waxay tahay inay u hogaansamaan TFCA.
- **Hubi liiska waxyabaha badeecada lagu daray** si aad uga eegto kiimikooyinka xaddidan. Si aad u hesho macluumaad hagid, fadlan akhri [Hagaheena Xeerka Sunta Alaabaha Is qurxinta¹¹](#) ama [iimayl noo soo dir¹²](#) si aad u hesho caawimaad.
- **Alaabaha lagu gado Gobalka Washington.** Inkastoo aysan jirin damaanad qaad ah in dhammaan alaabuhu u hogaaansami doonaan sharciga, Ujeedada TFCA waa inay hubiso in alaabaha la isku qurxiyo ee lagu gado Gobalka Washington noqdaan kuwo ka xadidan kiimikooyinka.

Haddii alaab taala saaluunka la ogaado inaysan u hogaansamin sharciga, waxaan la shaqeyn doonaa saaluunka ama takhasuslaho alaabaha la isku qurxiyo si aan saaluunka oga saarno alaabaha aan sharciga u hogaansamin. Wuxaan la xariir doonaa shirkada qaybisa inaysan u joojiso qaybinta alaabaha aan sharciga u hogaansamin ee ay ka qaybinyeso Gobalka Washington.

Su'aasha 7: Maxay tahay inaan sameeyo si aan ugu hogaansamo TFCA?

Jawaab: Waa arin ku xiran shirkadaha inay u hogaansamaan sharciga cusub ayna helaan habka ugu fiican ee ay u hubinayaan u hogaansanaanta. Si aad u hesho macluumaad hagid oo ku saabsan u hogaansanaanta TFCA, fadlan akhri [Hagaheena Xeerka Sunta Alaabaha Is qurxinta](#) ama [iimayl noo soo dir](#) si aad u hesho caawimaad.

Ugama baahnin hay'ada sharciga inay:

- Inay cadayn usoo gudbiyaan hay'ada si loo muujiso in alaabahaagy u hogaansamayaan sharciga.

¹¹ <https://apps.ecology.wa.gov/publications/SummaryPages/2404019.html>

¹² ToxicFreeCosmetics@ecy.wa.gov

- Alaabta ka xaqijiyaan cid sadexaad oo xaqijin sameysa.
- Tijaabo ku sameeyaan alaabta ama tayada hawada.

Inkastoo qolyaha saddexaad ee xaqijinada sameeta ay gacan ka geysan karaan in alaabtu u hogaansameyo sharciga iyo in kale, hadana qolyaha saddexaad ee xaqijinta sameeya ma xaqijiyaan mana damaanad qaadaan in alaabtu u hogaansameyo sharcigaan cusub.

Su'aasha 8: Sidee takhasuslaha Bay'ada u go'aamiyaa u hogaansanaanta TFCA?

Jawaab: Marka laga yimaada caawimaada waxbarashada iyo farsamada, Takhasuslaha bay'ada wuxuu isku dari karaa xeelado badan si uu uga taageero hay'ada' sharciyada inay sameeyaan horumar ku aadan u hogaansanaanta. Xeeladaha waxaa loo adeegsan karaa in lagu hubiyo u hogaansanaanta oo ay kujirto:

- Akhrinta maclumaadka ilaha dadwaynaha sida calaamadaha caamka ah, xaashiyaha xogta badqabka, iyo kaydka dadwaynaha.
- Sameynta falanqeyn suuq/la socoshada suuqa iyo isha ku haynta dib usoo celinta alaabaha iyo meesha ka saarista.
- Codsashada iyo akhrinta maclumaadka sharciga soo saartay bixisay.
- Sameynta tijaabo gaaban (akhrinta [Kaydka tijaabada alaabaha Bay'ada](#)).¹³
- Akhrinta natijjooyinka tijaabada alaabaha kale ee la daabacay.

Haddii aan ogaano alaab aan sharciga u hogaansamin, waxaan la xariiri doonaa hay'ada sharciga fulinta waxaana la wadaagi doonaa xogta si kor loogu qaado u hogaansanaanta.

Su'aasha 9: Maxaa dhacaaya haddii alaab la ogaado inaysan u hogaansamin sharciga?

Jawaab: Hadafkeena koowaad waa inaan ka taageerno dhammaan hay'ada sharciga kor u qaadista u hogaansanaanta. Haddii alaab tafaariikh ahaan loo gado ama taala saaluun la ogaado inaysan u hogaansamin sharciga, waxaan la shaqeyn doonaa taariikhleyda ama ganacsiga is qurxinta si loo aqoonsado shirkada alaabta soo saartay iyo shirkada bixisay alaabta. Waxaan kala shaqayn doonaa:

- Tafaariikhleyda ama qofka dukaanka is qurxinta leh si ay qaanadooda uga saaraan alaabta aan sharciga u hogaansamin.
- In alaab qaybiyuhu joojiyo qaybinta alaabaha la aqoonsaday inaysan sharriga u hogaansamin uuna joojiyo ka qaybinta Gobalka Washington.
- In shirkada soo saarta dib u eegto alaabaha aan sharciga u hogaansamin maadaama ay muhim tahay inay sharciga u hogaansamaan si looga qaybiyo ama loogu qado Gobalka Washington.

¹³ <https://apps.ecology.wa.gov/ptdbreporting/Default.aspx>

Su'aasha 10: Qof lagu soo rogi karaa ganaax haddii uu sameeyo, gado, ama qaybiyo alaab aan sharciga u hogaaansamin?

Jawaab: Maamulka Xeerka Sunta Alaabaha la isku qurxiyo ayaa soo saari kara ganaaxyada u hogaaansanaan la'aanta sharciga oo waafaqsan ([Farqadca 70A.560 RCW](#)).¹⁴

Hay'ada sharciga ayaa masuul ka ah u hogaaansanaanta sharciga TFCA. Muhiimadeena koobaad waa inaan ka taageerno hay'adaha sharciga u hoggaansamaan iyada oo loo marayo isku darka wacyi-gelinta, waxbarashada, iyo caawimaada. Inta badan, waxbarashada iyo kaalmada farsamada ayaa ku filan si loo saxo dhibaato jirta.

In kastoo sida aan doorbinezayn ay tahay inaan kala shaqeyno hay'adaha sharciga u hoggaansanno, waxaan u adeegsan karnaa go'aankeena fulinta markaan ka jawaabno kiisaska aan u hogaaansamaynin sharciga. Wuxaan inta badan diirada saareynaa shahsiyaadka iyo ganacsiyada soo noqnoqday ee aan u hogaaansamin sharciga ama sameeya xadgudubyo aad u waawayn. Wuxaan tixgalineynaa arrimo badan ka hor inta aanan go'aan ka gaarin tallaabooyinka aan qaadi lahayn waxaana uga jawaabi karnaa siyaabo kala duwan, laga bilaabo waraaqaha digniinta in loo diro ilaa ganaax lacag ahaaneed.

Ugu dambeyntii, waxaan dooneynaa in hay'adaha sharci fulinta inay fahmaan mas'uuliyadooda hoos timaada sharcigaan iyo inay sameeyaan waxyaabaha danta u ah macaamiisha, ganacsiyada, shaqaalaha, iyo deegaanka.

Su'aasha 11: Xadidaadaha cusub ma saameynayaan alaabaha hadda la wado in la sameeyo?

Jawaab: Haa. Xayiraadaha waxay khuseeyaan dhammaan alaabaha is qurxinta laga bilaabo Janaayo 1, 2025. Alaabaha tafaariikhlayda Gobolka Washington ay leeyihin sida kaydka yaala ka hor Janaayo 1, 2025, oo aan u hogaaansamin xayiraadaha cusub waxaa laga iibin karaa dadweynaha illaa Janaayo 1, 2026.

Yeelada Wacyi-gelinta

Su'aasha 12: Sidee Takhasuslaha Bay'ada ugu wargelinayaay hay'ada arimaha ku saabsan Xeerka Sunta Alaabaha la isku qurxiyo?

Jawaab: Wuxaan hay'ada sharciga kula xariirnaa iimaylo ka socda [Liistadene iimaylada Sunta Alaabaha la isku qurxiyo](#)¹⁵ iyo inaan boostiyo macluumaad soo gelino [websaytkeena](#).¹⁶

Wuxaan la shaqeynay in ka badan 25 urur oo leh shabakado jira oo kamid ah waaxda is qurxinta si aan ugu dirno iimaulo oo ayna u helaan xogo ku saabsan TFCA. Ururadaan waxay direen in ka badan 25,000 iimayl oo loogu talagalay dhinacyada daneynaaya anaga na matala.

Wuxaan ku casuuunay inay hubiyaan boggeena webseedka oo ayna iska diiwaangeliyaan liiskeena helitaanada iimaylada. Wuxaan u dirnay kaararka boostada ilaa 900 oo ganaci oo ku yaala Gobolka Washington ayadoo loo maraayo Nidaamka Nooca Shirkada Lagu aqoonsado ee

¹⁴ <https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=70A.560>

¹⁵ <https://public.govdelivery.com/accounts/WAEZY/signup/40162>

¹⁶ <https://ecology.wa.gov/TFCA>

Waqooyiga Mareykanka (North American Industry Classification System, NAICS). Ugu dambeintii, waxaan la xiriirnay 125 urur oo bulshada katirsan, 35 waaxood oo caafimaad oo deegaabka ku yaala, iyo 35 xiriiro caafimaad qaabulsan qabiil iyo dhalinyarada.

Waxaan soo saarnay war saxaafadeed, qoraallo web, iyo qoraalada warbaahinta bulshada, waxaanna wareysi siinay dhowr warbaahin oo aan uga hadalnay TFCA.

Waxaan mar walba raadinaynaa siyaabo aan ku ballaarin karno wacyi-gelinteen. Haddii aad qabto fikrado ku saabsan sida aan u gaari karno daneeyaasha daneynaya arrintan iyo bulshada, fadlan nala soo socodsii, [fadlan noo soo sheeg](#).¹⁷

Su'aasha 13: Waa maxay taageerada Waaxda Bay'adu bixineyso si ay uga caawiso hay'ada sharciga sidii loogu hogaansami lahaa shuruudaha cusub?

Jawaab: Si aad gacan uga geysato buuxinta shuruudaha TFCA, waxaad akhrin karta [dhukumiintigeena hagaha ah](#)¹⁸ iyo [waxaadna noo soo diri kartaa iimayl](#) si aad u hesho caawimaad farsamo oo gaar ah.

Waxaan bixinaa hindisooyin iskaa wax u qabso ah oo loogu talagalay ganacsiyada doonaya inay ka gudbaan u hoggaansanaanta sharciga. Shirkadaha soo saara alaabaha is qurxinta ee yaryar waxay dalban karaan [barnaamijkeena shahaadada alaabaha is qurxinta ee badqabka ah](#)¹⁹ si ay u helaan taageero farsamo iyo taageero maaliyadeed ugana ganacsandaan alaaboo badqab ah. Dadka gada alaabaha la isku qurxiyo iyo ganacsiyada yaryar ee alaabaha la isku qurxiyo gada waxay lasoo xariir karaan [nala soo xariir](#) si ay u ogadaan hindisooyin ay ugu wareehi karaan ka ganacsiga alaaboo badqab ah.

¹⁷ ToxicFreeCosmetics@ecy.wa.gov

¹⁸ <https://apps.ecology.wa.gov/publications/SummaryPages/2404019.html>

¹⁹ <https://ecology.wa.gov/cosmetics-manufacturers>

Kheyraadka

Halkaan waxaa ku qoran kheyraad dheeraad ah si aad uga qaybqaadato oo aad wax badan uga ogaato Sharciga Alaabaha Sunta ah ee Washington iyo Sharciga Alaabaha La isku Qurxiyo.

[Hagaha Xeerka Kahortaga Sunta Alaabaha la isku Qurxiyo: Xayiraadaha la saaro Shirkadaha Alaabaha la isku qurxiyo iyo Dadka Gada](#)²⁰

[Sharciga Qabyo qoraalka ah ee Hore](#)²¹

Bogaga Websaytka:

- [Xeerka Sunta Alaabaha la isku Qurxiyo - Waaxda Deegaanka ee Gobalka Washington \(Washington State Department of Ecology\)](#)²²
- [Xeerka Ka hortaga Sunta Alaabaha la isku Qurxiyo](#)²³
- [Sharciga Sameynta Alaabaha la isku Qurxiyo: Xayiraadaha Alaabaha La isku Qurxiyo](#)²⁴
- [Barnaamijka kabida shahaadada alaabaha la isku qurxiyo ee Badqabka ah](#)
- [Barnaamijka u badelashada alaabaha la isku qurxiyo ee badqabka ah](#)²⁵
- [Bogga webka dhinacyada daneynaya Kahortaga Sunta Alaabaha la isku qurxiyo](#)²⁶

Warbixinada alaabaha la isku qurxiyo ee lala wadaago sharci dejinta:

- [Kiimikooyinka Alaabaha la isku qurxiyo ee ay adeegsadaan Dadka degan Washington - Natijjooyinka Wajiga Koowaad](#)²⁷
- [Kiimikooyinka Alaabaha la isku qurxiyo ee ay adeegsadaan Dadka degan Washington - Natijjooyinka Wajiga Labaad](#)²⁸

Macluumaad ku saabsan Sunta:

- [Washington State Department of Health – Lead](#)²⁹
- [Ilaha Ugu Badan ee Sumawga Lead](#)³⁰

²⁰<https://apps.ecology.wa.gov/publications/SummaryPages/2404019.html>

²¹ https://www.ezview.wa.gov/Portals/_1962/Documents/Cosmetics/TFCA_PrelimDraftRule_2024-07.pdf

²² <https://ecology.wa.gov/TFCA>

²³ <https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=70A.560>

²⁴ <https://ecology.wa.gov/regulations-permits/laws-rules-rulemaking/rulemaking/wac-173-339>

²⁵ <https://ecology.wa.gov/waste-toxics/reducing-toxic-chemicals/product-replacement-program/cosmetics>

²⁶ https://www.ezview.wa.gov/site/alias__1962/38927/toxic_free_cosmetics.aspx

²⁷ <https://apps.ecology.wa.gov/publications/summarypages/2304007.html>

²⁸ <https://apps.ecology.wa.gov/publications/summarypages/2404022.html>

²⁹ <https://doh.wa.gov/community-and-environment/contaminants/lead>

³⁰ <https://doh.wa.gov/community-and-environment/contaminants/lead/common-sources-lead-poisoning>

Macluumaadka Daabacaada

Warbixintan waxaa laga heli karaa websaytka Department of Ecology ee barta
<https://apps.ecology.wa.gov/publications/SummaryPages/2404047SO.html>

Macluumaadka xiriirka

Hazardous Waste and Toxics Reduction Program

Washington State Department of Ecology Headquarters
P.O. Box 47600
Olympia, WA 98504-7600
Talefoonka: 360-407-6700

Websaytka: [Waaxda Deegaanka ee Gobalka Washington \(Washington State Department of Ecology\)](https://apps.ecology.wa.gov/publications/SummaryPages/2404047SO.html)³¹

Helitaanka ADA

Department of Ecology waxaa ka go'an inay siiso qaabilada laxaad la'aanta macluumaad iyo adeegyo lagu buuxinayo ama lagu dhaafinayo shuruudaha Sharciga Dadka Maraykanka ee Naafada ah (Americans with Disabilities Act, ADA), Qaybta 504 iyo 508 ee Sharciga Dib u Dejinta, iyo Siyaasada Gobolka Washington lambarka 188.

Si aad u dalbato habaynta adeegyada ADA, kala xiriir Ecology talefoonka 360-407-6700 ama iimaylka hwtrpubs@ecy.wa.gov. Adeegyada Dadka Naafada ah ee Washington ama TTY wac 711 ama 877-833-6341. Booqo websaytka Waaxda Bay'ada³² si aad u hesho macluumaadka dheeraad ah.

³¹ <https://ecology.wa.gov/contact>

³² <https://ecology.wa.gov/accessibility>